Caqiidada Kitaabka Qudduuska ah ee Qoondaynta iyo Canshuurta ee Badeecadaha Beeraha

Pentateuch

Haddaba Fircoon nin caqli iyo xigmad leh ha eego, oo isaga ha uga sarreeyo dalka Masar. Sidan Fircoon ha sameeyo, oo saraakiil dalka ha u dooro, oo dalka Masar inta shanaad ha soo bixiyeen toddobada sannadood oo barwaaqada ah. Oo cuntada sannadaha wanaagsan oo iman doona oo dhan ha soo ururiyeen, hadhuudhkana ha ku kaydiyeen gacanta Fircoon, oo cunto ha lagu kaydiyo magaalooyinka. Cuntaduna kayd bay dalka u ahaan doontaa toddobada sannadood oo abaarta ah oo dalka Masar ka dhici doonta; si aan dalku abaarta ugu baabi'in. Bilowgii 41:33-36

Oo haddana wuxuu soo ururiyey cuntadii toddobadii sannadood ee dalka Masar oo dhan tiil, oo cuntadii wuxuu ku kaydiyey magaalooyinka; Bilowgii 41:48

Markaasaa waxaa bilaabatay toddobadii sannadood oo abaarta, sidii Yuusuf yidhi; laakiinse dalka Masar oo dhan waxaa jirtay cunto. Oo markii dalkii Masar oo dhammu wada abaarsaday ayaa dadkii Fircoon cunto ugu qayliyeen. Fircoonna wuxuu Masriyiintii oo dhan ku yidhi, Yuusuf u taga; wuxuu idinku leeyahay yeel. Bilowgii 41:54-55

Yuusufna aabbihiis iyo walaalihiis iyo reerkii aabbihiis oo dhan ayuu cunto ku quudiyey sidii reerahoodu ahaayeen. Oo dalkii oo dhan cunto ma haysan; waayo, abaartu aad bay u xumayd, sidaas daraaddeed dalka Masar iyo dalka Kancaan oo dhammu waa la taag darnaadeen abaarta aawadeed. Yuusufna wuxuu ururiyey lacagtii dalka Masar tiil oo dhan, iyo tii dalka Kancaan tiil oo dhan, hadhuudh ay ku iibsadeen; Yuusufna lacagtii wuxuu soo geliyey gurigii Fircoon. Oo markii lacagtu ka dhammaatay dalka Masar iyo dalka Kancaanba ayaa Masriyiintii oo dhammu u yimaadeen Yuusuf, oo waxay ku yidhaahdeen, Cunto na sii, waayo, maxaannu hortaada ugu dhimanaynaa? waayo lacagtu way fashilantay. Yuusufna wuxuu yidhi, Idinku xoolihiinna keena; oo anna waxaan idinka siin doonaa xoolihiinna, hadday lacagtu dhammaato. Markaasay xoolahoodii Yuusuf u keeneen, Yuusufna wuxuu iyagii cunto ugu beddelay fardo, iyo adhigii, iyo lo'dii, iyo dameerradii; oo sannaddaas ayuu cunto u daajiyey xoolahoodii oo dhan. Oo markii sannaddaas dhammaatay ayay sannaddii labaad u yimaadeen, oo waxay ku yidhaahdeen, Sayidkaygiiyow, ka qarin mayno in lacagtayagii ay khasaartay; lo'dayada, sayidkaygiiyow; Sayidkaygiiyow, wax kale hortiisa kama hadhin, jidhkayaga iyo dalalkayaga mooyaane. Haddaba bal maxaannu hortaada ugu dhimanaynaa annaga iyo dhulkayaguba? Annaga iyo dhulkayagu cunto ku iibso, oo annaga iyo dhulkayaguba Fircoon baannu addoommo u noqon doonnaa; oo abuur aannu noolaanno oo aynaan dhiman, yaanu dalku cidla ahayn. Yuusufna dalkii Masar oo dhan buu Fircoon u iibsaday; waayo, Masriyiintii nin waluba wuxuu iibiyey beertiisii, maxaa yeelay, abaartii waa ku xumayd; Oo dadkiina wuxuu u kaxeeyey xagga magaalooyinka soohdinta Masar darafkeedan ilaa geesteeda kale. Isagu dhulkii wadaaddada oo keliya ma uu iibsan; Waayo, wadaaddadu waxay lahaayeen qayb Fircoon, oo waxay cuneen qaybtoodii Fircoon siiyey, oo sidaas daraaddeed ma ay iibin dhulkoodii. Markaasaa Yuusuf wuxuu dadkii ku yidhi, Bal eega, maantaan Fircoon idiin soo iibiyay idinka iyo dhulkiinnaba; Oo markay korodho, waxaad Fircoon siin doontaan shan meelood oo meel, oo afar meelood ayaa idiin ahaan doona midhaha beerta, iyo cuntadiinna, iyo kuwa reerihiinna, iyo cuntadii dhallaankiinna. Oo iyana waxay yidhaahdeen, Adigu naftayadii waad badbaadisay, haddaba sayidkaygiiyow,

aynu raallinimo ka helno, oo annana waxaannu Fircoon u noqon doonnaa addoommo. Yuusufna wuxuu sameeyey qaynuun ku saabsan dalka Masar ilaa maantadan in Fircoon lahaado shanta meelood meel. dhulkii wadaaddada oo keliya oo aan Fircoon yeelan mooyaane. Bilowgii 47:12-26

Falanqaynta:

Casharkii: Fircoon (Dowlad / Boqor / Madaxweyne / Dawlad)
Lessee: Beeralayda

Wasiirka / Xoghayaha Beeraha: Joseph Zaphnathpaaneah "The Seed Bearer"

Qoondaynta Dhul-beereedka: Ugu yaraan 20% guud ahaan bedka dhulka waa in la beeraa

Miisaaniyadda iyo Maareynta Faa'iidada:
Canshuurta iyo Tobnaadka: 20%
(10% Fircoon; 10% Wadaaddada - Kaniisadaha iyo dhulkooda waa cashuur-dhaaf.)
Mushaharka saafiga ah ee beeralayda: 80%
(40% ee Abuurka Beerta - Beeridda; 40% cuntada)

Magaal kastaa waa in ay quudin kartaa.

Waxtarka ugu badan, dadku waa inay ku noolaadaan meel u dhow sahayda cuntada.

Dhaqaale aan lagu taageerin cunto (ma aha dahab, ma qalin, lacag, ma crypto, iwm, laakiin cunto) ugu dambeyntii burburi doonaa. Si tartiib ah laakiin hubaal ah.

Xataa xilliga abaarta, cuntadu waxay leedahay qiimo waxayna u baahan tahay in la iibsado. Marna xor ma aha.

Lacagtu way dhici doontaa inta lagu jiro abaarta daran. Beddelka ayaa noqon doona habka wax kala iibsada (cuntada lo'da, fardaha, idaha, dameeraha, waqtiga - shaqada/adeegga). Fulin siyaasadda shaqo la'aan ha cunin (2 Tesaloniika 3:10).

Ku alla kii koontarooli kara sahayda cuntada ayaa samayn kara sharci oo dadka xakamayn kara.